

Wax dheeraad ah oo ku saabsan dugsiga xanaanada ka akhriso




Ku saabsan dugsiga xanaanada.




Xaqiiq iyo talooyin marka aad helayso oo is bar-bardhigayso dugsiyada xanaanada.

Macluumaadka xiriirka ee degmada aad ku nooshahay:



Qoraalkan waxaa diyaarisay Hey'adda iskoollada

Skolverket
Swedish National Agency for Education



Ku soo dhawow dugsiga xanaanada

Warbixin ku socota adigaaga haysta
ilmo u dhaxeeya hal iyo lix jir



Dugsiga xanaanada carruurta waa

- ku ciyaarayaan oo wax xiiso leh la samaynayaan carruurta kale
- wax ku baranayaan ciyaar, wax baar-baarid iyo qaabab kala duwan wax u abuurid
- ku horumarayaan dhinacyo badan oo kala duwan, tusaale ahaan xisaabta, sayniska iyo luqadda.

Miyaad haysataa ilmo u dhaxeeya hal iyo lix jir? Markaas ilmahaagu wuxuu aadi karaa dugsiga xanaanada!

Waxbarashada dugsiga xanaanadu waxay aasaaska u dhigtaa sii ambaqaadka waxbarashada ilmahaaga ee iskoolka iyo inta ka hartay nolosha. Dugsiga xanaanada waxaa ka shaqeeya macallimiin dugsi xanaano iyo shaqaale kale labadaba kuwaas oo ilmahaaga fursad u siinaya in ay horuumaraan oo ay wax ku bartaan jawi amaan ah.

Dugsiga xanaanada waxay ilmahaaga ku horuumarin karaan luqadda Iswiidhishka. Carruurta leh luqaddo hooyo oo kale oo aan ahayn luqadda Iswiidhishku waxay xitaa fursad u helayaan inay sii horumariyaan luqadahaas.

Bilow fiican sii ilmahaaga!

